



enterprises, inc.

HAGAHA XEERKA DHAQANKA 2018

Guddida U hogaansanka Shirkadda

Joe Puishys • Jim Porter • Pat Beithon • Warren Planitzer

Xaga Apogee waxaanu ku qabanaa shaqada darajada sharafta ugu saraysa iyo anshaxa dabeecada . Intaa waxa dheer, sharciyada iyo xeerarka gudaha Maraykanka iyo wadamada dibadda ah si kordhaysa waxay ugu baahan yihiin inay ka warhayaan falalkooda si ay u hubiyaan is waafaqsanaanta sharciyada ku habboon iyo xeerarka, Si looga caawiyo shaqaalaha inay fahmaan waxa iyaga laga filanayo iyo inay fuliyaan masuuliyadaha, Shirkadu waxay samaysay Barnaamijka U hogaansanaanta Shirkadda oo dhan ah oo uu Hagahan ka kooban yahay; Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, taas oo dhisto mabaadi'da anshaxa hagida ee Shirkadda iyo heerarka qabashada ganacsigeeda; iyo Xeerarka Shirkadda, taas oo ka kooban xeerarka u hogaansanaanta gaarka ah taas oo uu shaqaalahu raacayo.

Dhammaan shaqaalaha waxay ka masuul yihiin u hogaansanaanta dhammaan sharciyada, heerarka iyo mabaadi'da ay ka kooban tahay ama lagu tixraacay Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee, Xeerka Anshaxa ganacsiga iyo Dhaqanka, iyo Xeerarka Shirkadda. Xeerarka Shirkadda waxaa lagu dabaqaa shaqaalo kasta oo Shirkadda ah, ay ku jiraan shaqaalaha Apogee iyo shaqaalaha kuwa kasta oo toos ah ama aan toos ahayn ee ah shirkad ay maamusho, qayb ganacsi ama xarun, laga reebo ilaa xadka Xeerarka Shirkadda khilaafkooda wixii ah shuruud lagu dabaqo ama waajibaad ka kale ee Shirkadda ee waafaqsan sharciya lagu dabaqo.

Ku xad gudubka sharciga, Barnaamijka U hogaansanaanta ama Xeerar kale oo Shirkadda ah, nidaamyada, tilmaamaha, sharciyada shaqada, dhaqanada ama waxa la midka ah ma keeni karo tallaabo anshaxa ah, ay ka mid tahay eriyada. Ma jiro wax ka kooban Hagahan, Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, Xeerarka Shirkadda ama Barnaamijka Kale ee u hogaansanaanta wada xidhiidhka, owaxay abuureysa ama maldaha qandaraas shaqo.

Si looga caawiyo shaqaalahu inay fahmaan sharciyada iyo xeerarka saamaysa Shirkadda, inta kooban ee soo socota ee Xeerarka Shirkadda waa la horumariyay. Nuqulada Xeerka Apogee ee Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka, Xeerarka Shirkadda iyo Xeerarka kale ee Shirkadda waxaa loo heli karaa si uu shaqaalayaha dib u eego. Xaalada aan lagu tixraacin inta kooban ee soo socota laga yaabo ama lagama yaabo in la aqbal. Haddii aad su'aalo ka qabto, la xidhiidh kormeeraha, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, ama Lataliyaha Guud ee ee Apogee ama xubinta Guddida u Hogaansanka Apogee ee xaga xafiiska Shirkadda Apogee ee cinwaanka iyo lambarada telefoonka ku qoran "wargelinta iyo Baadhitaanka Xad gudubada."

Xusuuso, Apogee inuu adiga kugu xisaabtamayo si uu u caawiyo ballanka joogtada ah ee u hogaansanaanta mabaadi'dayada anshaxa, sharciga, iyo xisaabinta saxda ah iyo hawlaha hanti dhowrka.

WARGELINTA IYO BAADHITAANKA XAD GUDUBYADA

Haddii aad aaminsatahay in qof uu ku xad gudubayo sharciga, mabaadi'da ama heerarka ay ku jiraan hagahan, Xeerka Anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka ama aad walaac ka qabto ku saabsan xisaabaad wax la iska waydiin karo ama hawlaha hanti dhowrka, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka warbixiso xad gudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ama walaacyadaada. Waxaad uga wargelin kartaa xad gudubka ama walaacaaga kormeerahaaga kula shaqaynaya, maareeyaha sare, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, La taliyaha Guud ee Apogee lambarka 952.487.7514, xubinta Guddida U hogaansanaanta Apogee lambarka 952.835.1874, ama addoo u qoraya warqad la taliyaha Guud ee Apogee cinwaanka 4400 West 78th Street, Suite 520, Minneapolis, Minnesota, USA 55435. Waxaad sido kale ka wargelin kartaa magacoo la qariyo addoo la xidhiidhaya Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee bogga www.apog.ethicspoint.com. **Khadka tooska ee Xeerka Dhaqanka Apogee waxaa ka hawlgala suuqgeeye dibada ah oo aan ku xidhany Apogee.**

Fadlan eeg tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka bilaashka ah ee Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee ee boggaga 6 iyo 7 ee Hagahan ama bogga www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka "Apogee").

Wargelin kasta oo ah xadgudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ee sharciga ama Barnaamijka U hogaansanaanta ama xisaabaadka wax la iska waydiin karo ama dhaqanada hantidhowrida si degdeg ah oo buuxda ayaa loo baadhi doonaa.

KHADKA TOOSKA AH EE XEERKA DHAQANKA APOGEE

www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka "Apogee") (adduunka oo dhan) ama 800.441.6164 (wicitaanka bilaashka ah gudaha Maraykanka iyo Kanada). Fadlan eeg tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka bilaashka ee wadama ka baxsan Maraykanka iyo Kanada ee boggaga 6 iyo 7 Hagahan ama www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka "Apogee").

HAGAHA XEERKA DHAQANKA

XEERAK SHIRKADDA	XEERKA KOOBAN	FIIRSO
<p>Sharciyada Xaq ka dhiga Sharciyada iyo Dhaqanada Tartanka</p>	<p>Shirkadda waxaa ka mamnuuc ah gelida heshiisyada ama fahanada tartamayaasheeda khuseeya qiimayaasha alaabta ama adeegyada, lacag dhimista, ama shuruudaha kale ee iibka, macaashka ama xadka macaashka, kharashyada, qoondaynaya dhulalka ama macaamiisha, ama soo jeedin iib. Shirkadu sidoo kale kama xanibi karto dib u sii iibiyayaasha ama qaybiyayaasha xoriyada in dib loo sii iibiyo alaabta Shirkadda.</p>	<p>Falanqaynta tartamayaasha qiimaha, farsamaooyinka qiima jarida, suuq gaynta, alaabta aan la sheegin iyo adeegyada, dakhliyada iyo kharashyada ama macluumaadka kasta oo Shirkadu leedahay.</p>
<p>Sharciga ku Lidka ah Xeerka iyo Shuruucda</p>	<p>Shirkadu ma samayn karto shay kasta si ay ugu hogaansanto taageerada qaadicida ganacsiga wadanka aanay taageerin dowladda Maraykanku.</p>	<p>Ka jawaabida in la qaadaco codsiga. Codsiga in la taageero qaadicida Carabta ee Israa'iil.</p>
<p>Danta Khilaafka</p>	<p>Shaqaalahu waa inuu iska ilaaliyaa xaaladaha hawlaha halka dantooda gaarka ah ay iska hor imanayso, ama macquul ahaan u muuqato inay khilaafto, danta Shirkadda. Shaqaalaha qaarkood waxaa looga baahan doonaa inay dhammaystiraan Su'aalaha Xog qaadista Khilaafka Danta.</p>	<p>Ka helida hadyado xad dhaaf ah, feebar ama maaweelin shirkad hadda ama la filayo ama macmiil. Ku lahaanshaha dan dhaqaale shirkad tartan kula jirta, shirkad ama macmiil.</p>
<p>Hadyadaha iyo Mushaharka</p>	<p>Shaqaalaha ma bixin karo mana aqbali karo wax hadyad ah ama lacag abaal marin ah ama ka timid qof kasta ama shirkad raadinaysa inay ganacsi la samayso Shirkadda, si la xidhiidha wax kala iibsiga ku lug leh Shirkadda. Haya'adaha ama lacagta abaal marinta kuma xidhna wax kala iibsiga la aqbali karo haddii qiimahoodu hooseeyoo oo aanay ka badnayn is wanaajinta maxaliga ah ee caadiga ah.</p>	<p>Haya'daha ama lacagta abaal marinta ah oo leh qiima hoose oo uu shaqaale siiyo, ama uu ka aqbalo shaqaale shirkad, macmiil, qaybiye ama la taliye. Lacag siiya, ama ka aqbala lacag, shirkad, macmiil, qaybiye ama la taliye iyaddoon loo eegin inta ay leegtahay.</p>
<p>Xidhiidhaha Dowladda - Wax ka qabadka Saraakiisha Dad waynaha iyo Shaqaalaha</p>	<p>Lacag bixinta, haya'adaha, cuntooyinka ama lacag kale oo ah ujeedooyinka saamaynaysa sarkaalka kasta oo dad wayne ama shaqaale waa mamnuuc. Siinta shaqo saraakiisha dad waynaha ama shaqaalaha waa in hore u sii oggolaadaa La taliyaha Guud ee Apogee. Shaqaalaha waa inaanu been sheegin ama si xun u metelin runta marka lala xidhiidhaya sarkaalka dad waynaha ama shaqaalaha.</p>	<p>Lacag bixinta caddaanka ah, lacagta abaal marinta ah, maaweelinta saraakiisha dad waynaha, shaqaalaha, shaqaalaysiinta dadka uu codsado sarkaalka dad waynaha ama shaqaale. Si khaldan u metelka ama ku guul daraysiga si loogu daro macluumaadka muhiimka ah ee wada xidhiidhka lala leeyahay saraakiisha dad waynaha ama shaqaalaha.</p>
<p>Qandaraasyada Dowladda</p>	<p>U hogaansanka adag ee sharciyada iyo xeerarka kuwaas oo lagu dabaqo qandaraasyada dowlada waa ku waajib shaqaale kasta.</p>	<p>Haya'adaha ama wax isku dhiibida saraakiishada qandaraaska la siiyo. Ka hadalka fursadaha shaqada mustaqblaka ee Shirkadda lala yeesho saraakiisha qandaraaska. Aan raacsanayn qandaraas sax ah oo nidaamka xisaabaadka ah ama shuruudaha qandaraaska.</p>

HAGAHA XEERKA DHAQANKA

XEERAK SHIRKADDA	XEERKA KOOBAN	FIIRSO
Baadhitaanka Dowladda iyo Waraysiyada	Dhammaan codsiyada dowlada ee waraysiga ama warqaddaha waa in isla markaaba looga warbixiyaa La talinta Guud ee Apogee. Shaqaalaha ka qayb gala dowladda waraysiyadeeda waa inay bixiyaan jawaabo sax ah oo buuxa.	Damaanad raadinta, yeedhmo maxkamadeed, codsiyada ka yimid baadhayaasha dowlada ama sharci dejiyayaasha ee macluumaadka ku saabsan Shirkadda ama shirkaddaha kuwaas oo Shirkadu la ganacsato.
Wax kala iibsiga Caalamiga ah iyo Hawlgalada	Shirkadu waa inay u hogaansantaa dhammaan sharciyada iyo shuruudaha wixii ah wax kala iibsi kasta oo caalami ah si loogu hogaansamo sharciyada ku habboon ee Maraykanka.	Ku guul daraysiga in loo hogaansamo soo dejinta, dhoofinta, sarifka lacagaha, ama shuruudaha cashuurta ee wadanka ajnabiga ah ama xakamaynta dhoofinta, cunaqabatayn ganacsi ama sharciyada ku lidka ah qaadacaaada ee Maraykanka.
Xeerka Dhaqanada Musuqmaasuqa Ajbaniga	Lacag bixinta aan saxda ahayn ama haya'adaha wadamada dibadda ah ee la siiyo saraakiishada dowlada, siyaasiyiinta ama kooxaha siyaasada waa mamnuuca.	Lacag bixinta wax la iska waydiin karo, khidmadaha, haya'adaha ama lacag bixinta caddaanka ah ee saraakiisha ajnabiga ah ee dowlada, siyaasiyiinta ama kooxaha siyaasada. Hawlaha wadanka lagu yaqaano laaluushka. Khidmado si aan caadi ahayn u wayn ama u yar, boonooyinka ama lacagta qayb soo celinta.
Laaluushka iyo Wax isku dhiibida	Laaluushka iyo wax isku dhiibida waa la mamnuucaay.	Lacag bixinta wax la iska waydiin karo iyo qaban qaabooyinla la tashiga, ama haya'adaha xad dhaafka ah ama joogtada ah.
Hawlaha Siyaasada iyo Qancinta	Shirkadu waxay u hogaansami doontaa dhammaan sharciyada ku saabsan ka qayb galka siyaasada iyo qancinta.	Tabarucaadka siyaasada ee ka yimid maalka Shirkadda, U magdhabida Shirkadda ee tabarucaadka siyaasada Gaarka ah.
Ilaalinta Hantida Shirkadda iyo Macluumaadka	Macluumaadka ka kooaban diiwaanada Shirkadda ama kuwa ay samaysay Shirkadda waa hantida Shirkadda. Hantidan garaadka ah iyo macluumaadka iyo maaliyada Shirkadda iyo hantida waa in si ku filan amaan looga dhigaa si looga hortaggo tuugada, burburinta ama xidhitaanka aan la oggolaan ama isticmaalka.	Isticmaalka aan la oggolaan ama shaacinta macluumaadka shirkadu leedahay ee qoraalada xuquuqda dhowran leh ama sooftiweerka kombuyuutarka ee Shirkadda. Isticmaalka Khaladka ah ee Maaliyada Shirkada Isticmaalka gaarka ah ee hantida Shirkadda.
Fursadda Shaqada Loo Simanyahay	Shirkadda waxay bixin doontaa fursada shaqada loo siman yahay iyaddoo u eegin isirka, midabka, caqiidada, diinta, tafiirta, sinjiga, da'da, asalka qaranka, qaabka galmada, aqoonsiga jinsiga, naafanimada, heerka guurka, heerka ku saabsan caawimada dad waynaha, heerka qof ciidankii hore ahaa, ama heerka kale ee ku haboon dadka in la ilaasho ah.	Tallaabada laga qaado shaqaalaha ee ku salaysan isirka, midabka, caqiidada, diinta, tafiirta, sinjiga, da'da, asalka qaranka, qaabka galmada, aqoonsiga jinsiga, naafanimada, heerka guurka, heerka ku saabsan caawimada dad waynaha, heerka qof ciidankii hore ahaa, ama heerka hale ee ku haboon dadka in la ilaasho ah.

HAGAHA XEERKA DHAQANKA

XEERAK SHIRKADDA	XEERKA KOOBAN	FIIRSO
Dhibaataynta	Dhibaataynta galmada iyo dhibaataynta ku salaysan isirka, caqiidada, diinta, da'da, tafirta, asalka qaranka, naafanimada, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, heerka guurka, heerka ku saabsan caawimada dad waynaha, heerka qof ciidankii hore ahaan, ama heerka dadka nooca ku habboon in la ilaasho lama aqbali karo oo uma dul qaadan doonto Shirkadu.	Xidhiidhka jidhka aan la soo dhawayn; galmada ama faallooyinka la soo jeediyo ama kaftanka; tilmamaha galmada ah; laga roone labba sinjiile, khaniisad ama qofka sinjiigisa beddela faallooyinkooda am kaftanka. Dhibaataynta ku salaysan heer kasta oo ilaashan oo ku habboon. Khataraha ama tibaaxaha ee shaqaalaha gudbintiisa, ama diidmada ku soo dhawaanshaha galmada, waxay saamayn doontaa xaaldiisa ama teeda shaqaynta.
Sharciyada iyo Shuruucda Deegaanka	Shirkadu waxay u hogaansami doontaa sharciyada iyo shuruucda deegaanka.	Diiwaan haynta deegaanka ee aan dhammayska tiranayn. Daadashada aan laga Wargelin ama siidaynta. Daadinta qashinka aan saxda ahayn. Isticmaalka baabuurka xamuulka aan la oggolaan ama xarunta wax lagu daadiyo.
Si hoos uga Ganacsiga iyo Laaluushida iyo Maalgelin Khatar dhaqaale kaa dhowrta	Ma jiro shaqaale iibsan kara ama ka iibinaya saamiyada Apogee marka la hayo qoraal macluumaad aan dad wayne loogu talo gelin ama "tilmaan" macluumaad qoraal aan dad wayne loogu talo gelin kuwa kale ee gata ama iibsada saamiyada Apogee. Wax shaqaale ah kama qayb qaadan doono yaraynta wax kala iibsiga la xidhiidha saamiyada Apogee.	Ka ganacsiga, ama siinta macluumaadka kuwa kale, iyaddoo ku salaysan macluumaadka aan loo heli karin dad waynaha. Ka ganacsiga saamiyada shirkadaha guud ee kale ee lala sameeyo Apogee kaas oo ku lug leh wax kala iibsi suuragal ah. Gadista iyo iibinta qandaraasyada hore u sii kala iibsiga qandaraas mustaqbalka ah, qandaraas in la is waydaarsado oo lagu sii heshiiyo wakhti mustaqbalka ah, saami haysasho iyo is dhaafsigu lacageed oo loogu talo galay si loo yareeyo khasaare ama yaraynta waxay kordhisaa qiimaha suuqaa ee saamiyada Apogee.
Buuggaagta iyo Diiwaanada Saxda ah	Warbixinaha dhaqaalaha Shirkadda, buuggaagta, diiwaanada iyo warqaddaha loo gudbiyay kooxaha kale waa inay sax ahaadaan oo dhammaystirnaadaan, oo waa in loo diyaariyaa si waafaqsan mabaadi'da xisaabaadka la aqblay guud ahaan iyo qaabka ay Shirkadu caddaysay.	Been, diiwaano been ah ama laga saaray. Ku guul daraysiga in la raaco nidaamyada xisaabaadka, ama la isticmaalo xisaab maskaxda laga akhriyo. Ka saarida diiwaanada Shirkadda ee qoraalka dhabta ah ama macluumaadka uu sharcigu u baahan yahay ama lama huraan u ah in la sameeyo diiwaanaka aan marin habaabis ahayn.
Xogta Kombuyuutar ku kaydsan iyo Wada xidhiidhka	Dhammaan qalabka wada xidhiidhka iimaylada iyo codka ah iyo nidaamyada waxaa leh oo lagu hayaa gancsiga xeerka Dhaqanka Shirkadda. Shirkadda waxaa u dhowran xaq ay ugu kuurgasho oo kaga warhayso isticmaalka nidaamyada iyo waxa uu ka kooban yahay wada xidhiidhka gaarka ah iyo faylasha.	Isticmaalka nidaamyada Shirkadda si loo galo, loo diro ama loo helo qoraallada dhibtada leh, sharci darro ah, galma ahaan muuqda ama faaxisho ah. Isticmaalka gaarka ah ee xad dhaafka ah.
U shaacinta Macluumaadka Dad waynaha, Saxaafada iyo Faaqidaada	Shaacinta macluumaadka ku saabsan Shirkadda waa in lagu sameeyaa dhexda ta gaar ahaan loo oggolaaday iyo afhayeenada la magacaabay.	Shaacinta beenta ama macluumaadka marin habaabiska ah ee baahinta saxaafada ama warbixinaha loo gudbiyay dowlada ama masuuliyiinta sharciga. Shaacinta macluumaadka qarsoodiga ah ee Shirkadda loo shaaciyay dad waynaha guud. Shaqaalaha aan loo oggolaan ama loo magacaabin afhayeenada la hadla saxaafada ama falanqeyyaaal iyagoo metelata Shirkadda.

HAGAHA XEERKA DHAQANKA

XEERAK SHIRKADDA	XEERKA KOOBAN	FIIRSO
Anshaxa Shaqaalaha iyo Ka joojinta Shaqada	Waxa u dhowran Shirkadda xuquuqda anshaxa iyo ka joojinta shaqaale kasta iyo in go'aan laga gaadho anshax gaar ah in lagu soo rogo kiis kasta oo la bixiyo.	Isku dayga in la xadido anshaxa uu soo rogi karo Shirkadu.
Joojinta Sharci darrada	Shaqaalaha uga warbixiya daacad nimo xad gudubyada laga shakisanyahay ee sharciga, Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee ama Xeerarka Shirkadda ama qofka ka warbixiya walaacyada ku saabsan xisaabaadka la is waydiin karo ama hawlaha hantidhowrka lagama aargoosan doono. Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay inay ka warbixiyaan xad gudubyada la og yahay ama laga shakisanyahay ee sharciga, Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee ama Xeerarka Shirkadda.	Khataro kasta ama baqdin gelinta shaqaalaha ka warbixiya sidii xad gudubka sharciga laga shakisanyahay ama dhabta ah, Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee ama Xeerarka Shirkada ama walaacyada ku saabsan xisaabta wax la iska waydiinayo ama hawlaha hanti dhowrka.
Hirgelinta Barnaamijka U hogaansanka iyo Turjumaada	Guddida U hogaansanaanta waxay ka masuul tahay fahanka iyo hirgelinta Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee.	Dedaalada in la iska dhega mariyo ama “la hareer maro” sharciga, Barnaamijka U hogaansanaanta ama Xeerarka Shirkadda.
U hogaansanka Barnaamijka Hanti dhowrka iyo Ka warhaynta	Shaqaalhu waa inay raacaan Xeerarka Shirkadda, ka warbixiyaan xad gudubyada oo la shaqeeyaan dedaalada Shirkadda si loo soo urursho macluumaadka ku saabsan u hogaansanaanta.	Codsiyada in “la iska dhega mariyo” ama “la iska iloobo” marka u hogaansanaanta, xisaabaadka ama walaacyada hanti dhowrka waa la soo qaadaa. Ku guul daraysiga in laga warbixiyo xad gudubyada sharciga ama Barnaamijka U hogaansanka Apogee, ama Xeerarka Shirkadda ama walaacyada ku saabsan xisaabadka la is waydiinayo ama hawlaha hanti dhowrka.
U hogaansanka Barnaamijka Anshaxa	Shaqaalaha ku xad gudba sharciga, Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee ama Xeerarka Shirkadda waxaa laga qaadi doontaa tallaabo anshaxa ku habboon.	Ku guul daraysiga in la anshax mariyo shaqaalaha ku xad gudba sharciga ama Barnaamijka U hogaansanaanta.
U hogaansanka Barnaamijka Waxbarashadda iyo Caddaynta	Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay si muddaysan inay u kuurgalaan Hagaha Barnaamijka U hogaansanaanta, caddeeyaan fahankooda masuuliyadooda si ay u adeecaan warqad ahaan iyo ruux ahaan Barnaamijka u hogaansanaanta Apogee oo ka qaytb galaan tababarka u hogaansanaanta.	Ku guul daraysiga in la caddeeyo U hogaansanaanta Barnaamijka Apogee ee U hogaansanaanta. Ku guul daraysiga in laga qayb galo tababarka u hogaansanaanta.
Wargelinta iyo Baadhitaanka Xad gudubyada	Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay inay degdeg uga warbixiyaan dhammaan xad gudubyada la ogyahay ama laga shakiyay ee sharciga ku habboon, Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee iyo Xeerarka Shirkadda.	Warbixinaha waa in lagu sameeyaa daacadnimo. Shakhsiga habboon waxaa loo magacaabi doonaa inuu wax baadho. Warbixinaha waxaa la qarin karaa magaca. Warbixinaha loo sameeyay si aan daacad ahayn looma dul qaadan doono.

MASUULIYADAADA U HOGAANSANAANTA

Dhammaan shaqaalaha Apogee iyo shirkad kasta oo toos ama aan toos ahayn oo Apogee ah, waax, qayb suuq, qayb ganacsi ama xarun waxaa laga filayaa inay adeecaan sharciyada, shuruucda ku habboon, sharciyada, iyo amarada sharciga ah. **Waxaad ka masuul tahay helida aqoonta ku habboon ee shruudaha la xidhiidha waajibadaa si awood laguugu siiyo inaad aqoonsato arrimaha suuragalka ah ee u hogaansanka.** Uma cudur daari kartid fal sharci darro ah ama anshax darro ah addoo sheeganaya inaad garanayn falka inuu khalad ahaa.

MAAMULKA MASUULIYADA U HOGAANSANAANTA

Dhamman xubnaha maamulka waxaa loogabaahan yahay inay u hogaansamaan Barnaamijka U hogaansanaanta Apogee iyo Xeerarka Shirkadda. Maamulka Shirkadu waxa uu ka masuul yahay hubinta inaad hesho macluumaad habboon iyo tilmaan si awood laguugu siiyo adigu inaad fahanto oo u hogaansanto sharciga lagu dabaqo iyo shuruudaha anshaxa. Kormeerayaasha iyo maamulayaasha waxay ka masuul yihiin inay si firfircoon uga dhiirrigeliyaan shaqaalaha inay walaacyada ka hadlaan, su'aalaha iyo arrimaha la xidhiidha u hogaansan sharciga iyo anshaxa iyo xisaabinta la is waydiinayo ama arrimaha hanti dhowrka.

QARSOODIGA IYO KA ILAALINTA KU LIDKA AH AARGOOSIGA

Ilaa xadka sharcigu oggolaado, Shirkadda waxay qaadi doontaa feejignaanta macquulka ah si ay u jooqatayso qarsoodiga shakhsiyadka ka warbixiya xad gudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ee sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkadda ama xisaabinta wax la iska waydiinayo ama hawlaha hanti dhowrka taas oo warbixinta laga sameeyay. Waa lama huraan in shaqaalaha ka qaybta ah baadhitaanka ama kuwa sameeyay warbixinaha sharafta ballankan qarsoodiga ah. Si buuxda ayay mamnuuc y tahay shaqaale kasta inuu ciqaabo ama ka aargoosto shaqaale kale kaas oo si daacad ah uga warbixiyay xad guduyo ama xisaabaad la is waydiinayo ama hawlo hanti dhowr.

ANSHAXA SHAQAALAHAA EE XAD GUDUBYADA

Marka shaqaalaha loo go'aamiyo inuu ka qayb qaatay xad gudubka sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkadda ama ka qayb galay hawlo xisaabeed khalad ah ama hanti dhowrid, isaga ama iyada waxaa la anshax marin doonaa, ilaa iyo ay ka mid tahay ka joojinta shaqada. Intaa waxa dheer, Shirkadu waxa u dhowran xaqa lagu bilaabo dacwad madani ah oo ku lid ah shaqaalaha wixii ah xad gudubka oo loo gudbiyo arrimaha masuuliyiinta sharciga iyo maamulka ee tallaabadooda., Tallaabada anshaxa waxaa laga qaadi karaa kormeerayaasha ama hawl fuliyayaasha kuwaas oo is dhega tira, oggolaada ama ku guul daraysta inay qaadaan tallaabo habboon oo ku lid ah sharci darrada, dhaqanka anshaxa xun ama kale ee aan saxda ahayn. Waa xeerka Shirkadda inay ku dabaqdo anshaxeeda qaab is waafaqsan, si kastaba ha ahaatee, qaabka anshaxa kaas oo ku habboon waxa uu noqon doonaa mid xaalada u gaar ah.

WARGELINTA IYO BAADHITAANKA XAD GUDUBYADA

Shirkadu waxay dhiirrigelinaysaa shaqaalaheeda inay si daacad ah uga warbixiyaan xad gudubyada suuragalka ah ama xisaabadka la is waydiin kara ama arrimaha hanti dhowrka. Haddii aad aaminsatahay in qof uu ku xad gudbayo sharciga, mabaadi'da ama heerarka ay ku jiraan Hagahan ama xeer kasta oo lagu dabaqi karo Shirkadda ama walaac ka qabto ku saabsan xisaabaad wax la iska waydiin karo ama hawlaha hanti dhowrka, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ka warbixiso xad gudubka la og yahay ama laga shakisan yahay ama walaacyadaada. Waxaad ku samayn kartaa warbixinta addoo:

1. La xidhiidhaya kormeerahaaga idin maamula, maareeyaha sare, Waaxdaada Maamulka Shaqaalaha, La taliyaha Guud ee Apogee lambarka 952.487.7514, ama xubinta Guddida U hogaansanka Apogee lambarka 952.835.1874;
2. U qor warqad La taliyaha Guud ee Apogee 4400 West 78th Street, Suite 520, Minneapolis, Minnesota, USA 55435; ama
3. La xidhiidhida Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee si warbixinta loo sameeyo oo magaca la qarinayo xaga:
 - www.apog.ethicspoint.com (egeli magaca ururka ee "Apogee") (adduunka oo dhan).
 - 800.441.6164 (wicitaanka bilaashka ah gudaha Maraykanka iyo Kanada).
 - Ka eeg tilmaamaha sida loo sameeyo wicitaanka telefoonka bilaashka ah ee wadan aan ahayn Marayka ama Kanada.
 - Shaqaalaha doonaya inuu wargelin u sameeyo Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee ee jooga wadan aan Maraykanka ama Kanada ahayn waxa uu la xidhiidhi karaa Khadka tooska ah bogga www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka "Apogee") wixii tilmaamo ku saabsan meesha wicitaanka ah.

Khadka tooska ee Xeerka Dhaqanka Apogee waxaa ka hawlaga suuqgeeye dibada ah oo aan ku xidhany Apogee.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku warbixiso luqad aan Ingiriisi ahayn, waa inaad wacdaa Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee oo waa inaad waydiisato turjubaan. Wargelin kasta oo ah xadgudubka la ogyahay ama laga shakisan yahay ee sharciga ama Barnaamijka U hogaansanaanta ama xisaabaadka ama walaacyada hantidhowrida si degdeg ah oo buuxda ayaa loo baadhi doonaa. Haddii xad gudubka uu dhacay, Apogee waxay si macquul ah uga hortaggi doontaa xad gudubyo la mid ah. Intaa waxa dheer, warbixinaha xisaabaadka walaacyada hanti dhowrka waxaa looga wargelin doonaa Guddida Hanti dhowrka ee Guddida Maamulka Apogee. Xusuuso, ku guul daraysiga inaad ka warbixiso ama aqbalida xad gudubka sharciga, Barnaamijka U hogaansanka Apogee ama Xeerarka Shirkadda waxay keeni kartaa tallaabo anshax oo ay ku jirto ka joojinta shaqada.

TILMAAMAHA TELEFOONKA DHEERAADKA AH EE WICITAANKA TELEFOONKA LAGA SOO DIRO WADAN AAN AHAYN MARAYKANKA IYO KANADA

Haddii aad doonayso inaad samayso wicitaan bilaash ah oo Khadka Tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee laga soo diro wadan aan ahayn Maraykanka iyo Kanada, waxaad u baahan doontaa inaad garaacdo AT&T furaheeda garaacida ee goobtaada addoo isticmaalaya layn dibada ah iyo ka dib garaacida Khadka tooska ah ee Xeerka Dhaqanka Apogee lambarka telefoonka sida hoos lagu muujiyay.

Wadanka	AT&T Lambarka garaaca Access® Code	Doorashooyinka Luqadda
Brazil (Maya Telefoonka Gacanta)	0-800-890-0288	Bortoqiis (Brazilian), Ingiriis
Brazil (Telefoonka Gacanta)	0-800-888-8288	
Denmark	800-100-10	Dhaynish, Ingiriisi
Singapore (StarHub)	800-001-0001	Malay, Ingiriisi
Singapore (Sing Tel)	800-011-1111	
Boqortooyada Ingiriiska (British Telecom)	0-800-89-0011	Ingiriisi



- Sug xusuusinta oo ka dib garaac 800.441.6164.
- Taas waxaa lagaga jawaabi doonaa Ingiriisi. Si aad u sii wado wacitaankaaga luqadda kale ah, fadlan u sheeg luqadaada shaqaalaha telefoonka si aad u codsato turjubaan. Waxay qaadan kartaa dhowr daqiiqadood turjubaanku inuu safka soo galo. Ha dhigin telefoonka.

Lambarada furayaasha gelida garaacida tooska ah ee AT&T way isbeddeli karaan. Lambarka furaha garaacida tooska ah ee ku qoran hoos ma shaqaynayo, fadlan garaac lambarka furaha tooska ah ee AT&T ama booqo o www.apog.ethicspoint.com (geli magaca ururka ee "Apohee") ee liiska hadda ugu dambeeyay ee furayaasha garaacida.

GUNAANAD

Shirkadda waxaa ka go'an u qabashada hawlaheeda ganacsi qaab anshax leh iyo qaab aan khalad ahayn iyo gudaha warqadda iyo ruuxda dhammaan sharciyada iyo shuruucda. Hagahan waxaa loogu talo galay inuu si waanagsan kaga caawiyoi inaad fahamto sida loogu hogaansamo sharciga iyo mabaadi'da anshaxa ee Apogee iyo shuruudaha. Ugu dambeyn, si kastaba ha ahaatee, waxaa lagu daayaa inaad ku tiirsanaato qiimayntaada shakhsiga ah inaad go'aan ka gaadho jidka tallaabada saxda ah. Xusuuso inaad had iyo jeer isticmaasho qiyaastaada wanaagsan iyo dareenka si wanaagsan u dhaqanka.

